**Sharciga 10 Jennaayo 1962, lamba. 2.**

**Canshuur dhaafka ashtakada.**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Markuu arkay oggolaanshaha Golaha Xeerdejinta;

**WUXUU GUDDOOMINAYAA OO UU SAXIIXAYAA**

Sharciga soo socda:

**Qod. 1**

Ashtakada iyo dood-qoraalka (maxdarka) la xiriira, ka-tanaasulka ashtakada iyo ka-noqoshada ashtakada waxaa saaran canshuurta boollada.

**Qod. 2**

Waxaa la baabíinayaa wixii axkaam sharci ah oo aan la socon karin Sharcigan.

**Qod. 3**

Sharcigan waxa uu dhaqangelayaa maalinta ka dambeysa maalinta lagu nashriyo Faafinta Rasmiga, ee Jamhuuriyadda, waxaana lagu dabbaqayaa xataa dacwadaha socda goorta uu dhaqangelayo.

Sharcigan waxaa la gelinayaa (ridayaa) Uruurrinta Rasmiga, ee Sharciyada, waxaana lagu nashrinayaa Faafinta Rasmiga.

Qof kasta oo leh waxaa lagu khasbayaa in uu dhowro, inta kalana ku khasbo in uu u dhowro sida sharciga Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10 Jannaayo 1962.

Madaxweynaha Jamhuurriyadda
**Aden Cabdulle Cusmaan**

Wasiirka Kowaad
**Cabdirashiid ali Sharmarke**

Wasiirka Arr. Diinta iyo Caddaaladda
**Maxamuud Axmed Maxamed Caddaan**

Wasiirka Maaliyadda
**Cabdulqadir Maxamed Aden**